## Noocyada Kale Duwan ee Racfaanada

Hadii aadan ku qanacsanayn go'aanka ay gaartay hay'ada VRS, waxaa jira qaabab kala duwan oo loo xalin karo dhibka. Qaababkaa kala duwan waxaa loo kala qaybiyey 3 nooc oo aasaasi ah:

1. dib u eegid ladifan oo uu kormeere sameeyo
2. dhexdhexaadin
3. hab dacwo qaadid oo aan eex lahayn oo dowga la raaco

Khasab kuguma aha inaad kuwaa sameyso si kastaba ha u kala horeeyaane. Tusaale ahaan, khasab kuguma aha inaad isticmaasho dib u eegida ladifan ee kormeeraha ama habka dhexdhexaadinta ka hor inta aadan codsan habka dacwo qaadida ee aan eexda lahayn ee dowga la raaco.

## Dib u Eegida ladifan ee Kormeeraha

Hadii aadan ku qanacsanayn go'aan uu la taliyahaaga xirfadeyntu uu ka gaaray arrintaada, waxa aad codsan kartaa la taliyaha kormeerahiisu inuu dib u eego arrinta. Ku codso dib u eegida qoraal ahaan, ama adigoo xaadir ah, ama telefoon/TTY markii aad rabto.

Hadii aadan aqoon magaca ama ciwaanka kormeeraha, wac Xafiiska weyn ee Maamulka ee VRS ee St. Paul. Iyaga ayaa ku siin akhbaartan.

Agagaarka beledyada, ka wac 651-259-7366
Minnesota Dibada ah oo dhan, ka wac 1-800-328-9095

Kormeerahu arrintaada ayuu dib u eegaa ka diba waxa uu go'aansadaa in nidaamyada iyo xeerarka VRS sax ah loo waafajiyey arrintaada. Kormeerahu waxaa kale oo uu go'aansadaa hadii ay jiri karaan wax waanwaan ama xal ah oo dhibka wax ka qaban kara.

## Dhexdhexaadinta



Dhexdhexaadintu waa qaab loo xaliyo khilaafaadka oo:

- ka caawin kara adiga iyo shaqaalaha VRS inaad xalisaan khilaafkiina ku saabsan baahida iyo adeegyada
- isticmaala, dhexdhexaadiye dhana aan raacsanayn si uu idiin ku hago xal cid walbaa ogolaan karto

Hay'ada VRS waa khasab inay bixiso wixii khidmad dhexdhexaadin ah ama kharashaad kale ah. Dhexdhexaadiyahu loo isticmaalo dhexdhexaadinta arrimaha tababarada xirfadeynta waxaa soo hela Xiriiriyaha Barnaamijka Dhexdhexaadinta arimaha Tababarada Xirfadeynta. Dhexdhexaadiyeyaashu waxa ay khibrad u leeyihiin dhexdhexaadinta waxay kaloo leeyihiin wuxuun aqoon ah oo ku saabsan arrimaha tababarada xirfadeynta. Ma aha iyagu shaqaale ka tirsan hay'ada VRS.

